

Xuquuqdaada FoodShare

Waxa aad xaqa u leedahay:

- Inaad maanta codsato oo lagaa caawiyo sidii aad ku codsan laheyd.
- In lagu siiyo lacagta FoodShare (ama lagu wargeliyo haddii aadan ka soo bixin shuruudaha barnaamijka) 30 cisho gudahood marka aad codsato.
- In lacagta FoodShare lagu bilaabo todoba cisho gudahood haddii aadan heysan lacag ama aad lacag yar heysato kana soo baxday shuruudaha barnaamijka.
- In lagu qabto dhageysi haddii aadan nagu raacsaneyn go'aanka aan ka gaarnay codsigaaga.

Codsi maanta oo kala soco access.wi.gov  ama la xiriir hay'adda .
Wixii caawinaad ah, wac 1-800-362-3002.



Odhaada USDA ee Joojinta Heybsooca

Sida uu dhigayo sharciga madaniga ee Dawladda Dhexe iyo U.S. Department of Agriculture (USDA) (Wasaaradda Beeraha ee Mareykanka) ee nidaamka madaniga ah iyo xeerarkiisa hay'adda USDA, hay'adaha hoos yimaada, xafiisyadiisa, iyo shaqaalaha, iyo hay'adaha ka qeyb qaadanaya barnaamijyada ay maamusho USDA waxaa ka reeban in ay sameeyaan heyb sooc ku dhisan qowmiyadda, halka uu qofku ka soo jeedo asal ahaan, jinsiga, diinta uu aaminsan yahay, naafanimo, da'da, cidida uu siyaasadda raacsan yahay in loogu geysto aargoosasho mid kasta oo ka mid ah barnaamijyada madaniga ah ee maamusho ama maalgeliso USDA.

Dadka naafada ah ee leh baahida gaar ah si ay u helaan macluumaadka barnaamijkan (sida farta waaweyn ee lagu qoro, farta waaweyn ee la daabaco, cajalad loou duubo, Luqadda Fara Ka Hadalka ee Mareykanka, iwm.) waa in ay la xiriiraan hay'adda la shaqeyneysa (heer Gobol ama degaan) halka ay ka codsadeen macaashka. Dadka dhagaha la'a maqalka ama hadalku ku adag yahay waxa ay la soo xiriiri karaan USDA iyaga oo u soo maraya Adeegga Fariimaha ee Dawladda Dhexe ee (800) 877-8339. Waxaa intaa dheer, in macluumaadka barnaamijyada aad ku heli karto afafka kale ee ka baxsan afka Ingiriisiga.

Si aad u soo gudbiso cabasho ku saabsan barnaamijka, buuxio foomka cabashada ee USDA Program Discrimination Complaint Form, (AD-3027) oo aad ka heleyso barta internetka: <https://www.ascr.usda.gov/how-file-program-discrimination-complaint>, oo aad geyn karto mid kasta oo ka mid ah xafiisyada USDA, ama u soo qor waraqaad aad ku soo hagaajisay USDA warqaddana ku soo qor dhamaan macluumaadka lagaa codsaday. Si aad u codsato foomka cabashada soo wac (866) 632-9992. U soo dir cabashadaada ama waqradaada USDA ee:

(1) boostada: U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410;

(2) faakis: (202) 690-7442; ama

(3) iimeyl: program.intake@usda.gov.

Shaqada ay hay'addani qabato waa mid dadku u siman yahay.